

# Dugsiga Harrison Park Waxaa Loo Bedelayaa Inuu Noqdo Dugsi Dhexe

Maalgalintii mashruuca dhismaha ee sanadkii 2020 waxaa laga maalgaliyey in dugsiga Harrison Park K-8 loo bedelo inuu noqdo Dugsi Dhexe. Inkastoo aan si buuxda loo casriyey, haddana shaqadda laga qabanayaa waxay si weyn kor u qaadi doontaa dugsiga. Mashruucu wuxuu ardayda siin doonaa waayo-aragnimo ku haboon marka kor loo qaado dhismayaasha si ay kor ugu kacdo waxbarashadu.


## **Dhismuhu wuxuu saameyn ku leeyahay dugsiga inta lagu gudo jiro sanad-dugsiyeedka 2023-24**

- Mudnaanta koowaad waxaan siinaa nabadgelyada.
- Goobaha dhismaha ka socdo iyo ardayda waxaa kala qeybinaya derbiyo, sidaas darteed ardaydu ma soo gali karaan meelaha uu dhismuhu ka socdo.
- Boodhka iyo qashinka ka dhasha dhismaha socda waxaa lagu ururiyey meelo gaar ah oo la xiray iyada oo ayna soo gaarin doonin dugsiga.
- Inkastoo uu jiri doono dhawaq ka dhasha dhismaha socda, haddaba hawla ugu sawaxanka badan waxaa la qorsheeyey inay la qabto saacadaha ay ardaydu dugsiga ka maqan yihiin.



## **Shaqadu waxay socotaa sanadkan**

- Nidaamka kuleylinta iyo qaboojinta iyo dab-damiyaasha dugsiga.
- Sheybaadh cusub ee sayniska(STEAM),fasalada sayniska, fasalka farshaxanka, goobo waxbarasho oo la ballaariyey.
- Dib u habeynta, iyo dayactirk La-taliyaasha, Caafimaadka iyo Waxbarashada Gaarka ah, Jiimka, iyo Istuudiya Qoob ka ciyaarka.
- Dib u habeynta fasalada goobaha NW, sidii ay si fiican ugu shaqeyn lahaayeen.
- Kor u qaadista musqulihii hore u jiray, fasalada, iyo goobaha la maro.



## **Jadwalka**

Shaqadu waxa ay bilaabantay 2022 iyada oo la dhammeystiri doono xillig dayrta 2024.

## **WADA JIR AYNU MUSTAQBALKEENA U WADA DHISANO**

[pps.net/Page/19049](http://pps.net/Page/19049)

[schoolmodernization@pps.net](mailto:schoolmodernization@pps.net)

(503) 916-2222



**Si joogta ah u booqo shabakada si aad u hesho macluumaad dheeraad ah**

